



# Caddeynta kasoo horjeedidda Gudniinka Gabdhaha

## Maxaa caddeyntaan sababay?

Caddeyntaan dibadda ayaad u qaadan kartaa. Waxaadna caddeyntaan tusi kartaa faniilkaaga. Sidaas ayaa ku caddeyn kartaa in gudniinka gabdhuhu uu Nederland mamnuuc ka yahay, oo aad xabsi ku muteysan karto haddii aad gabadhaada guddo.

**Caddeynta meesha aad waraaqahaaga safarka gashato ku xanaaney, si aad mar walba oo aad dibadda aadeyso u qaadato.**

## Gudniinka gabdhuhu waa dembi

**Gudniinka gabdhuhu waa dembi maadaama ay jirdil (waxyeeyn) culus tahay. Gudniinka gabdhuhu waa ku xadgudbid xuquuqda ilmaha iyo tan haweenkaba. Nederland dhammaan noocyada gudniinka gabdhaha mamnuuc ayey ka yihiin. Taasina waa mid qof walba oo Nederland degan quseysa, xitaa dadka aan sharciga lahayn.**

Gudniinka gabdhaha wadanka Nederland waa ka mamnuuc maadaama uu yahay mid ka mid ah silcinta/jirdilka carruurta. Waxaana sharcigu dhigayaa in qofka ugu badnaan 12 sano laguugu xukumi karo. Xukun intaas ka badan qofka waa lagu xukumi karaa haddii waalidka naftiisu yahay qofka gabadhiisa gudniinka ku sameeyey (qodobka 300 ilaa iyo 304 ee buugga sharciyada dembiga).

## Gudniinka gabdhuhu dhibaato halis ah ayuu keenaa

**Gudniinka gabdhuhu dhibaato halis leh ayuu caafimaadka u keeni karaa. Tusaale ahaan dhiigbax xoog leh ayaa gabdhaha marka la gudayo ku dhici kara ama nabarka ayaa jirran kara oo infakshan halis ah keeni kara amaba gabadhu wey u dhiman kartaa.**

Xitaa marka la guddo kadib gudniinka la gudey darteed gabdhuhu dhibaato badan ayey qabi karaan. Tusaale ahaan: xanuun ah markey kaadineyso, xanuuno ah marka caadadu ku dhacdo, kaadimareenada oo jirada, dhalmo la'aan iyo dhibaato markey dhaleyso ah. Xitaa gabadha inay isku buuqdo ayuu gudniinku u keeni karaa. Dumar badan ayaa noloshooda oo dhan xanuun iyo dhibaato gudniinka u keenay ku jira.

Waalidiintu waxay xitaa ciqaab muteysanayaan haddii ay qof kale inuu gabadhooda u guddo u dirsadaan (ku amraan). Waalidiinta ilmahooda dibadda kusoo guda ama in loogu soo guddo sameeya Nederland dembigoodaas waa lagu qaadi karaa. Waalidiinta gabadhooda ku soo guddo dibadda waxay taasi awgeed Nederland ku muteysan karaan ciqaab. Sidoo kale xubnaha reerka ka tirsan ama dad kale oo gabadh ka timid Nederland guddo waxay mudan yihiin in xeerka ciqaabta lagu qaado, xitaa haddii dadkaasi aysan Nederland degganeyn. Waalidiinta lagu qaaday xukun ah in gabadhooda ay gudeen (loo gudday) oo aan lahayn basaboortu Nederland ah, waxaa dhici karta in aan loo oggolaan in ay Nederland sii degganaadaan.

Waalidiinta inay gabadhooda gudeen darteed dembiga ah loo xukumay, isla markaana aan dhalasho Nederland ah haysan, waxay halis u yihiin in loo diido sii joogista Nederland.

Caddeyntaan waxaanu ka rabnaa in intii karaankeena ah aan gabdhaha gudniinka uga badbaadino, si ay jir ahaan iyo maskax ahaanba caafimaad-qab ugu koraan.

Adigoo xushmad mudan,

Hugo de Jonge, Wasiirka Caafimaadka, Daryeelka iyo Ciyaaraha

Sander Dekker, Wasiirka Ilaalinta Sharciga

## Su'aalo?

Haddii aad su'aalo gudniinka gabdhaha ku saabsan qabto, waxaad mar walba ballan la sameysan kartaa dhaqtarka ama kalkaalisada xarunta daryeelka hooyada iyo carruurta (Consultatiebureau) ama GGD.

Waxaad xitaa macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa

[www.meisjesbesnijdenis.nl](http://www.meisjesbesnijdenis.nl) ama [www.tegenvrouwenbesnijdenis.nl](http://www.tegenvrouwenbesnijdenis.nl).

Caddeyntaan waxaa taageersan:

Wasiir ku xigeenka Caafimaadka, Daryeelka iyo isboortiga

Wasiirka Amniga iyo Caddaaladda


Juun 2019  
Somalisch

Caddeynta kasoo  
horjeedidda Gudniinka  
Gabbhaha

Caddeyntaan waxaa taageersan:




Angela Bransen  
ActiZ Jeugd (xirfad-yaqaanada daryeelka caafimaadka)




Astrid Nielsen  
Ururka Dhakhtarada Carruurta Dhajka (AJN)



dhr. A. Ware  
Dalladda ururada Soomalida ee Nederland (FSAN)




Annemieke van der Bas  
Ururka Dhakhtarada Qarsoodiga ah ee Ku xad gudubka  
Carruurta iyo Gabood falka Guriga (VVAK)



mw. Y.A.J.M. Dabekausen  
Dalladda ururada howlaha caafimaadka haweenka  
(NVOG)



dhr. H.A.M. Backx  
Dallada xarumaha caafimaadka magaaloyinka  
(GGD NL)



René Héman  
Hey'adda horumarinta Cilmiga caafimaadka ee  
boqortooyada Nederland (KNMG)



Mieke Beentjes  
Hey'adda Umuliyayaasha ee boqortooyada Nederland (KNOV)



Drs. P. Heijdenrijk  
Pharos, Xarunta Khibrada ee Dhajka ee Kala duwanaan-  
shaha Caafimaadka



mw. drs. F.Z. Özgümüş  
Dalladda Ururada Qaxootiga (VON)

Goobta loogu talagalay waalidiinta in ay saxiixaan: